Qofka Ahlu Qur'aanka ah waxaa lagu oran: akhri oo kor u soco, oo ku Luuqee sidaad ugu Luuqayn jirtey Aduunka, Gurigaagu waa halka Aayada ugu dambaysa aad ku akhrido)

Cabdullaahi Binu Camar Binu caas Allaha ka raali ahaado isagiyo Ạabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofka Ahlu Qur'aanka ah waxaa lagu oran: akhri oo kor u soco, oo ku Luuqee sidaad ugu Luuqayn jirtey Aduunka, Gurigaagu waa halka Aayada ugu dambaysa aad ku akhrido).

[Xadiis Xasan ah] [waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi,nasaa.i oo kawayn kuwariyey iyo Axmad]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in lagu oran doono Qofka Qur'aanka akhriya, kuna camal fala, ee laasima akhrintiisa iyo xifdintiisa markuu Janada gelayo: Qur'aanka akhri oo kor ugu soco darajooyinka Janada, kuna Luuqee sidaad ugu Luuqayn Jirtay akhrintiisa Aduunka, u akhri si dagan oo xasilooni leh, Gurigaagu waa halka ay kaaga dhamaato Aayada ugu dambaysa akhriskeedu.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/65054